



Amarada Ka-hortaga Gudniinka Gabdhaha

Sideebay ii difaaci karaan?

Waraaqdaan waxay faahfaahinaysaa sidii Amarka Ka-hortaga Gudniinka Gabdhaha (oo luqada ingiriiska lagu yiraahdo Female Genital Mutilation (Naafaynta Xubnaha Taranka Dumarka) ama FGM marka lasoo gaabiyo). Hadii aad ka walwalsantahay in adiga, ama qof aad garanayso, loo gaystay ama uu halis ugu jiro FGM. Waxay faahfaahinaysaa qofkee codsan kara amar, faahfaahinaysaa waxaad u baahantahay kuuna sheegaysaa wixii dhacaya markii maxkamadu hesho codsigaaga.

Waa maxay Gudniinka Gabdhaha?

Gudniinka Gabdhaha wuxuu ka koobanyahay habraacayada dhan ee ku lug leh goynta qayb ama kuli qaybta banaanka ah ee xubinta taranka dumarka ama dhaawacid kale ee xubnaha taaranka dumarka sababu aan ahayn kuwo caafimaad dartood. Ma leh wax faaido caafimaad ah waxayna gabdhaha iyo dumarka u dhibaataysaa siyaabo badan. Waxay ka kooban tahay goynta iyo dhaawicida xubinta taranka dumarka oo caafimaad qabta oo caadi ah, sidaas darteedna waxay wax u dhimaysaa shaqaynta dabiicigaa ee jirarka gabdhaha iyo dumarka. Dhaqankaan wuxuu sababaa xanuun badan wuxuuna leeyahay dhowr natiijo caafimaad ee waqti dhow iyo mid fokba, oo ay ka mid yihiin dhibaato ilma dhalista sidoo kalana ilmaha halis galinaysa.

FGM waxaa loo yaqaanaa dhowr magac, oo ay ka mid yihiin “goynta xubnaha taranka dumarka”, “gudniin” ama “bilowga”. Da`da gabdhahu ama dumarka lagu gudo aad ayeey ugu kala duwantahay bulshooyinka waxayna ka dhici kartaa UK iyo sidoo kale dabadiisa. Habraacaan waxaa la samayn karaa markii gabadhu ay dhalato, intay caruurnimada ama dhalinyaranimada kujirto, wax yar ka hor intaan la guursan ama uurka u

horeeya gudahiisa. Kiisaska badanaa, hase ahaatee, waxaa loo maleeyaa inta u dhaxaysaa da`da 5 iyo 8 jir saas darteedna gabdhaha da`daas u dhaxeeya ayaa halis badan kujira.

Gudniinka Gabdhaha waa ka mamnuuc UK, England, Wales iyo Northern Ireland, dhaqankaan wuxuu mamnuuc ku yahay Sharciga FGM 2003 (Female Genital Mutilation Act 2003) iyo Scotland wuxuu mamnuuc ku yahay Sharciga Maamnuucida FGM 2005 (Prohibition of Female Genital Mutilation (Scotland) Act 2005. Gudaha sharciga 2003, qof waxaa ku cadaanaya dambi hadii ay gooyaan kuli ama qayb xubnaha taranka ee gabar ama dumar, oo ay ka mid yihiin ku caawinta gabar in ay goyso jirgeeda ama caawinta qof aan mu`adin UK ahayn in uu gabar xubnaheeda taran ku gooyo meel wadanka ka baxsan.

Sideebuu Amarka Ka-hortaga Gudniinka Gabdhaha ii caawin karaa?

Amarka Ka-hortaga Gudniinka Gabdhaha wuu ku caawin karaa hadii:
aad aaminsantahay in aad halis ugu jirto FGM;
haraan lagugu sameeyay FGM; ama
aad garanayso qof ugu jira halis FGM.

Amarada Ka-hortaga FGM kiis kasta ayeey gaar u yihiin waxaana kujira sharuudo iyo tilmaamo sharci ah oo difaacaya adiga ama qofka halista ugu jira FGM. Maxkamadu si dagdag ah ayeey u samayn kartaa amar si difaacu uu meel maro isla markii.

Maxkamadu waxay samayn kartaa Amar Ka-hortaga si:
ay u difaacdo adiga ama qof kale oo halis ugu jira FGM; ama
ay u difaacdo adiaga ama qof kale oo lagu sameeyay FGM.

Codsiyada Amarada Ka-hortaga FGM waxaa la samayn karaa isla waqtiga baaritaanada booliiska, dacwooyin kale ee dambi ama dacwado maxkamada qoyska gudaheeda. Qofkii khilaafa amar maxkamad waxaa loogu taxaabi karaa xabsi ilaa labo sano yasid maxkamad laakiinse jabinta Amar Ka-hortag FGM sidoo kale waa gaf dambiyeed oo leh ugu badnaan shan sano oo xukun xabsi ah.

Xagee ka dalban karaa amar?

Codsi Amar Ka-hortag FGM waxaa laga samayn karaa Maxkamada Qoys (Family Court) ee England iyo Wales. Waxaad codsi ka samayn kartaa dhowr xarumood ee maxkamad. Liis xarumaha maxkamadaha la macaamila codsiyada nuucaan oo kale ah wuxuu ku yaal dhamaadka waraaqdaan.

Yaa dalban kara amar?

Qofka uu amarku difaacayo
qof sadexaad oo ku lug leh; ama

qof kasta oo kale oo maxkamadu u ogolaato.

Qof Sadexaad oo Ku lug leh waa qof uu qeexay Sarkaalka Ugu Wayn Maxkamadaha (Lord Chancellor) si uu codsi ugu sameeyo kuwo kale.

Dadka waawayn iyo caruurta (kuwa ka yar 18) way dalban karaan Amar Ka-hortag FGM . Caruurta waxay yeelan karaan “saaxiib xiga” ama qof caawiya, laakiin kumaqasbana, hadii ay leeyihiin wakiil sharci ama hadii maxkamadu ogolaato.

Hadii aad ka walwalsantahay in aad imaato maxkamada

Ku qor walaacaaga foomka codsiga ama codsigaaga si qoraal ah ugu dir Maamulaha Bixinta Adeega Maxkamada (Court Delivery Manager) sida ugu dhaqasiyaha badan ama waxaa ku dhacaya daahid dhagaysiga codsiga.

Maxkamaduhu waxay bixin karaan:

qolol sugid oo kala duwan ee maxkamad;

qolol soo galid iyo ka bixid oo kala duwan ee maxkamad; ama

gaari dhigasho maxkamada dhulgeeda si loogu sahlo imaashaha dhismaha maxkamada marqaatiyaasha cabsanaya.

Tas-hiiliyaad difaacida marqaatiyada ayaa sidoo kale laga heli karaa maxkamado qaarkood.

Hadii aad ka walwalsantahay in aad cadayn ka dhiibto gudaha qolka maxkamada

Maxkamada ugu sheeg walaacyadaada foomkaaga codsiga. Maxkamada ayaa go`aminaysa waxa munaasibkaa waxayna amri kartaa:

Shaashado lagu hubinayo in marqaatiyadu aysan argi karin jawaabayaasha maxkamada gudaheeda (kiiska nuucaan ah jawaabayaasha waa qofka ama dadka lagu eedeeyay in ay qorsheeyeen habraaca FGM). Shaashado ayaa waxaa lagu wareejiyay sanduuqa marqaatiga ee maxkamada gudaheeda si uusan marqaatigu u argin jawaabayaasha, jawaabayaashuna aysan u argin maqraaqtiga intay bixinayaan cadaymaha..

Cadaynta Video laga duubay. Tan waxay suurto galinaysaa waraysi in lala yeesho marqaatiga, oo la duubay dhagaysiga ka hor, in lagu tuso ahaan marqaatiga cadayntiisa ugu muhiimsan, yacni marqaatigu uma baahna in uu mar kale sheego wixii uu horay u sheegay, laakiin waa qasab in la heli karo si wax looga suaalo wuxuu sheegay hadii loo baahdo.

Xiriir toos ah ee TV/video, oo u ogolaanaya marqaatiga in uu qolka maxkamada meel ka baxsan cadayn ka bixiyo. Tani waxay u ogolaanaysaa marqaati in uu kubixiyo cadayn xiriir TV ee qol kale ee dhismaha

maxkamada ama dhisma kale gabi ahaan. Inkastoo marqaatigu uusan imaanayn qolka maxkamada, kuwa maxkamada jooga way ka argayaan marqaatiga isagoo bixinaya cadayn shaashadaha TV.

Maxkamada ayeey u taal in ay go`aamiso wixii munaasib ah, waxay ahaataba, kiis kasta.

Maxkamadu waxay bixin kartaa tas-hiiliyaadka dheerigaa oo soo socda:
hadii aad naafo leedahay ama aad u baahantahay kaalmo ama tas-hiiliyaad khaas ah, fadlan lasoo xariir maxkamada si aad u waydiiso kaalmaha la heli karo. Liis xarumo maxkamado iyo lambaro taleefano wuxuu ku yaal waraaqdaan dhamaadgeeda.

Hadii aad u baahantahay turjubaan waayo kuma hadashid English, waa in aad ogaysiisaa maxkamada si mid loo qorsheeyo, adigoo qeexaya luqada iyo laajada.

Meeqaa qarash ku baxaya?

Majirto khidmad maxkamad ee usamaynta codsi Amarka Ka-hortaga FGM naftaada ama qof kale. Sidoo kale, majirto khidmad maxkamad ee habraac kasta oo dheeri ah oo kiiskaaga ku lug leh sida:

codsi badalid ama joojin amar;

codsiyo kusocda Maxkamada Qoyska si ay u fiiriso sida loola dhaqmayo qofka buriyay amarka; ama

codsiyo sharci ilaaliye maxkamada in uu geeyo amarka.

Ma heli karaa kaalmo sharci?

Haa. Kaalmo sharci (legal aid) waad heli kartaa markii laga wakiilayo kiiska-hortag FGM oo ay ka mid yihiin xirista ka dhalata burinta amarka. Abuukaate, ama xubin Xarun Sharci ama Wakaalada Latalinta Mu`adiniinta (Citizens Advice Bureau), ayaa talo kaa siin kara in aad haysato kiiis macquul ah. Macluumaad dheeri ah ee kusaabsan kaalmo sharci iyo sida loo helo la taliye sharci waxaa laga heli karaa internetka www.gov.uk/legal-aid ama soo wecida 0845 345 4 345 (Isniinta ilaa Jimcaha, 9 subaxnimo-6:30 galabnimo).

Naftayda ma u codsan karaa Amar Ka-hortaga FGM?

Haa, ama waxaad u heli kartaa abuukaate in uu tan kuu sameeyo. Haddii adigu aad codsato, waa qasab in aad u diyaar garowdaa buuxinta foomamka quseeya iyo bayaanada aanadna maxkamada u faahfaahiso kiiskaaga.

Haddii aad u baahantahay kaalmo buuxinta foomamka, aanadna garanayn saaxiib ama qaraabo kaa caawin kara, waa in aad aada abuukaate ama Citizens Advice Bureau. Shaqaalaha maxkamadu way kaa caawin karaan faahfaahinta habraaca maxkamada, laakiin kaama siin karaan talo sharci awooda kiisas khaas ah, ama natiijada laga fili karo.

Foomamkee u baahanahay?

Waxaad u baahantahay codsi Amarka Ka-hortaga Gudniinka Gabdhaha (Foom FGM001). Haddii aad u baahantahay ogolaashaha maxkamada si aad ugu dalabto qof kale, waxaad u baahantahay in aad buuxiso Foom

FGM006 – Codsiga ogolaasho Codsiga Amarka Ka-hortaga Gudniinka Gabdhaha.

Foomamkaan oo dhan waa bilaash. Waxaad kasoo aruursan gartaa xarumo kasta ee maxkamad oo la macaamila codsiyada Amarada Ka-hortaga Gudniinka Gabdhaha (liis xarumaha maxkamadahaan wuxuu ku yaalaa waraaqdan dhamaadkeeda) ama waxaad kasoo guursan kartaa foomamka websitekeena ah hmctsformfinder.justice.gov.uk.

Samaynta codsiga Amarka Ka-hortaga FGM

Hadii aad tahay qofka uu difaacayo amarku ama qof sadexaad oo ku lug leh (oo uu qeexay Lord Chancellor) waa in aad buuxisaa foomka FGM001 - Application for a Female Genital Mutilation (FGM) Protection Order. Waxaad macluumaad dheeri ah oo sida loo buuxiyo foomka ka heli kartaa gadaasha Foomka FGM001. Waxaad u baahantahay koobiyaal kufilan in aad siiso jawaabayaasha la magacaabay oo dhan.

Codsigu waa in uu kujiro faahfaahino sida aad rabto in maxkamadu kuu difaacdo ama qofka halista ugu jira FGM, sida in laga hortago in adiga ama qofka halista ugu jira FGM wadanka dabadiisa la geeyo si loo soo gudo.

Codsiga waa in uu kujiraa faahfaahino wadahadal kasta oo kugu keenay in aad aaminto in aad halis ugu jirto FGM.

Hadii aad rabto in aadan usheegin jawaabayaasha cinwaankaaga ama cinwaanka qof kasta oo lagu sheegay foomka codsiga, waa in aad buuxisaa Foomka C8 ee Cinwaanka Sirtaa (Form C8 Confidential Address). Waxaad ka heli kartaa foomkaan xarumaha maxkamad ee lagu liisgareeyay waraaqdaan ama websitekeena ah hmctsformfinder.justice.gov.uk.

Hadii aad u codsanayso qof in la difaacdo waa qasab in aad buuxisaa Form FGM006 - Application for leave to apply for a Female Genital Mutilation (FGM) FGM Protection Order adikoo waydiinaya ogolaashaha maxkamada in aad codsato amar.

Waxad u baahandoontaa in aad samayso bayaan, hadii aad waydiisanayso in codsiga la dhagaysto iyadoon ogaysiis la siin jawaabayaasha xaalad dagdag ah (eeg hoos).

Maxaan sameeyaa hadii aan u baahanay amar dhaqso?

Waxad waydiisan kartaa maxkamada in ay fiiriso codsigaaga isla markii ayna samayso amar iyadoon jawaabayaasha loo gayn wax dookumentiyoo ah. Tan waxaa loo yaqaan ex-parte ama amar bilaa ogaysiis ah.

Hadii xaakimku uu sameeyo amar bilaa ogaysiis ah, waxaa lagu siinayaa balan dheeri ah oo aad kutimaado maxkamada. Jawaabayaasha waxay

xaq u leeyihiin in ay joogaan balantaan si xaakimku uu u dhagaysto qof kasta intuusan go`aansan in uu sameeyo amar kale.

Hadii aad codsanayso amar bilaa ogaysiis ah waa qasab in aad samaysaa bayaan marqaati, oo ay ka mid tahay bayaan run sheegid. Hadii aad adiku is wakiilanayso, waa qasab in aad samaysaa bayaan qoran, adikoo qeexaya sababta aad ugu baahantahay difaac aadna lagaysaa maxkamada foomka codsigaaga ee FGM001. Bayaanka run sheegida waa in ay tiraahdaa:

[Waxaan aaminsanahay] [(codsadaaha ama qofkay tahayba) aaminsanahay] in xaqiiqooyinka lagu sheegay [magaca dokumentiga la xaqiijinayo] in ay run yihiin:

Maxaan sameeyaa markaan buuxiyo foomamka?

Waa in aad maxkamada ugu gudbisaa boosto ama shaqsi foomamka la buuxiyay iyo koobiyaal. Sidoo kale codsigaaga waxaad kudiri kartaa email.

Maxaa dhacaya markaan maxkamada ugudbiyo foomamka?

Maxkamadu waxay xaqiijinaysa foomamka waxayna kusiinaysaa Ogaysii Dacwad Amar Ka-hortaga FGM (Form FGM002)- (Notice of Proceedings for a FGM Protection Order (Form FGM002)). Tan waxay kuu sheegaysaa taariikhda balantaada ee xaakimka hortiisa.

Adiga ayeey dan kuu tahay in aad timaadid maxkamada taariikhda foomka ku taal. Waa in aad diyaar u ahaato in aad bixiso cadayn kasta oo aad u malayso in ay kaa caawinayso in aad soo bandhigto dhinaca kiiskaaga.

Foomka codsiga (FGM001 ama FGM006) iyo foomka Ogaysiiska Dacwada (FGM002)) waa qasab in la siiyaa jawaabayaasha iyo dadka kale. Hadii uu abuukaate ku caawinayo, foomamka waxaa loo dirayaa iyaga in ay geeyaan.

Waxaad waydiisan kartaa maxkamada in ay foomamka kuu gayso adiga. Maxkamadu waxay ku waydiin kartaa in aad foom u buuxiso tan. Maxkamadu waxay kadib qorshayn doontaa in codsigaaga koobigiis iyo dokumentiyo kale uu geeyo sharci ilaaliye.

Codsiyada Electronikaa

Hadii aad niyaysantahay in aad codsigaaga kusoo dirto email, waxaad kaliya oo u baahantahay in aad hal koobi oo codsigaaga oo dhamaystiran kusoo dirto cinwanka emailka ka muuqda macluumaadka maxkamada dhamaadka hagahaan.

Dokumentiga electroonikaa waa qasab in ay ku wadato saxiix ama magac la taybkareeyay bayaanka runta gudahiisa. Waxaad u baahandoontaa in aad haysato dokumentigaaga asal ee saxiixan taasoo maxkamadu ay u baahan doonto in ay aragto.

Codsiyada email ee la soo diro kadib 4 galabnimo lagama shaqayn doono ilaa maalinta shaqada ee xigta.

Maxaan sameeyaa hadii aan geeyo dokumentiyada anigu?

Waa in aad qorshaysaa in qof (sida habraac geeye) uu geeyo koobi foomka codsiga (FGM001 ama FGM006) iyadoo ay la socdaan ogaysiis balamo dhagaysi ama jihahyn kasta ee gudaha foomka Ogasiiska Dacwooyinka (FGM002) jawaabayaasha, yacni qofka ay dacwadu kusocoto (hadii uusan ahayn codsadhaha), iyo qof kasta oo kale oo maxkamadu si toos ah u amarto iyadoon ka yarayn laba maalin ka hor tariikhda codsiga la dhagaysanayo. Hase yeeshee, maxkamadu way yarayn kartaa mudadaan.

Kadib markii dokumentiyada la geeyo waa in aad buuxisaa Bayaanka Adeega (Form FL415) -(Statement of Service (Form FL415)- aadna kan maxkamada la faylgaraysaa. Foomka FL415 wuxuu sheegayaa yaa loo geeyay, side iyo meeshee ayaa lagu siiyay dokumentiyada iyo maalintee iyo waqtigee. Waxaad ka heli kartaa foomkaan xarumaha maxkamad oo dhan oo lagu liisgareeyay waraaqdaan ama websitekeena ah hmctsformfinder.justice.gov.uk.

Hadii aadan heli karin cinwaanka kuwa loo gaynayo ama ay u egtahay in ayka meermeeraysanayaan gaynta, waxaad waydiisan kartaa maxkamada in qaab kale ugu gayso waraaqaha (tusaale, meel shaqo).

Maxaa ka dhacaya dhagaysiga?

Dhagaysiga codsiga Amarka Ka-hortaga FGM waxaa lagu dhagaysanayaa meel gooni ah (tan waxaa caadi ahan la yiraahdaa 'gudaha qololka' ('in chambers'), hadii aysan maxkamadu si kale amrin, dhagaysigana waxaa laga samaynayaa diiwaangalin. Maxkamadu waxay u ogolaan kartaa dad kale in ay joogaan maxkamada, tusaale, saaxiib ama la taliye madax banana, si tageero ahaan.

Codsadayaasha waxaa looga baahan karaa in ay maxkamada siiyaan cadayn hadal ah. Dhirirka dhagaysiga wuu kala duwanyahay, iyadoo ku xiran kiiska adaykiisa iyo in jawaabayaashu ka doodayaan eedaymaha.

Markii xaakimku fahmo labada dhinacba aragtidooda, waxay go`aamin karaan waxa soo socda midkood:

in ay u baahanyihiin macluumaad dheeri ah oo adiga kugu saabsan, iyo jawaabayaasha oo dhan. Waa lagu sheegayaa macluumaadka dheerigaa oo aad geenayso;

in ay u baahanyihiin macluumaad dheeri ah, laakinse ay diyaar u yihiin in ay sameeyaan amar mudo gaaban 'kumeeel gar' ah ilaa macluumaadka dheerigaa oo dhan la keeno. Waxaa lagu siinayaa balan cusub, waana lagu sheegayaa macluumaadka dheerigaa oo aad keenayso;

in ay diyaar u yihiin in ay sameeyaan amar waqti qeexan ah, oo kadib maxkamdu ay kiiska dib u eegi doonto. Waxaa lagu siinayaa taariikh balan cusub iyo koobi amarka maxkamada; ama

in ay diyaar u yihiin in ay sameeyaan amar. Maxkamadu waxay samayn kartaa amar waqti mudo qeexan ah ama amarku wuu iska socon karaa ilaa aad kabadasho ama joojiso adigu, jawaabayaasha ama maxkamada laftigeeda. Waxaa lagu siinayaa koobi amarka.

Maxaa dhacaya dhagaysiga kadib?

Hadii maxkamadu samaysay Amar Ka-horta FGM, codsadaha ayaa ugaynaya koobi amarka iyo dokumentiyo kale ee maxkamada jawaabayaasha, qofka ay dacwooyinku ku socdaan (hadii uusan ahayn codsadaha), iyo qof kasta oo kale oo lagu magacaabay amarka shaqsi ahaan sida ugu dhaqsiyaha badan. Waxaad waydiisan kartaa maxkamada in ay adiga kuu gayso dokumentiyada (eeg kor).

Sidoo kale waa in aad booliiska u gaysaa amarka iyadoo ay la socdaan bayaano tusaya in jawaabayaasha iyo dad kasta oo kale oo maxkamadu amartay in loo geeyay amarka ama lagu wargaliyay sharuudaheeda. Amar iyo bayaan waa in la geeyaa saldhiga booliiska ee cinwaanka qofka uu amrku difaacayo, hadii aysan maxkamadu qeexin saldhig booliis oo kale. Waxaad waydiin kartaa maxkamada in ay adiga kuu gayso dokumentiyada (eeg kor).

Ka waran hadii aan rabo in aan badalo, dheereeyo ama joojiyo amarka?

Waxaad samayn kartaa codsi badalid, dheerayn ama joojin amarka ka-hortaga FGM waqti dambe. Waxaad u baahandoontaa in aad buuxiso Foomka FGM003 – Codsiga badalida, dheeraynta ama joojinta Amarka Ka-

hortaga FGM- (Form FGM003 - Application to vary, extend or discharge a Female Genital Mutilation (FGM) Protection Order).

Ka waran hadii jawaabuhu uusan adeecin amarka?

Burin Amarka Ka-hortaga FGM waxaa lagula macaamili karaa Maxkamada Qoyska ama dacwayn maxkamad dambi.

Gudaha baaragaraafka 7(1) ee qaybta Jadwalka 2 ee sharciga FGM 2003, waxaad codsi u diri kartaa Maxkamada Qoyska in burinta loola macaamilo ahaan yasid maxkamad aanadna ka codsato Maxkamada Qoyska waaran xarig. Codsadaha waaranka xarig waa in uu kaalmeeyo bayaan sheegaya sida amarka ama qorshaha loo buriyay. Codsiga waa in lagu sameeyaa foomka waaranka xariga ee amarada ka-horrtaga FGM ee **Form FGM005 - Warrant of Arrest Female Genital Mutilation (FGM) Protection Orders.**

Meeshii maxkamada qoyska ay ku hesho in qof uu buriyay sharuudaha amarka, maxkamada ayaa kula macaamilaysa awoodeeda hoos tagta yasida maxkamada, taasoo ay ka mid tahay in ay xabsi u taxaabto ilaa labo sano.

Si kale, eedaymaha burinta Amarada Ka-hortaga FGM waxaa si toos ah loogu gudbin karaa booliiska, kuwaasoo xiri kara kuwa looga shagisanyahay in ay buriyeen sharuudaha amarka. Kadib baaritaan booliis ee burinta, Adeega Boqortooyada ee Dacwooyinka (Crown Prosecution Service) ayaa go`aminaya in ay dacweeyaan iyakoo isticmaalaya imtixaanka labada-darajo ee Qaanuunka Dacweeyayaasha Boqortooyada (Code for Crown Prosecutors): in ay jirto cadayn kufilan in dambiga lagu cadeeyo iyo hadii ay jirto, in dacwayntu ay dan ugu jirto shacabka. Ciqaabta ugu badan ee burinta Amarka Ka-hortaga FGM waa shan sano oo xarig ah.

Hadii Adeega Boqortooyada ee Dacwooyinka uu go`amiyo in uusan dacwayn sabab kastaba ha ahaatee, wali waxaad Maxkamada Qoyska ka codsan kartaa waaran xarig ee yasid maxkamad sida kor lagu sheegay.

Hase yeeshee, hadii qof lagu cadeeyay burin gudaha maxkamad dambi looma ciqaabi karo yasid maxkamad, dhinaca kalana sidoo kale yasid maxkamad looma ciqaabi karo burin amar.

Macluumaad dheeri ah ee kusaabsan ururada iyo adeegyada maxaligaa oo kusiin kara talo fadlan booqo websiteyada soo socda:

www.gov.uk/female-genital-mutilation

ama

Macluumaad dheeri ah iyo talo kusaabsan adeegyada maxaligaa oo la heli karo, waxaad taleefan udiri kartaa **NSPCC FGM helpline 0800 028 3550**, 24 saacadood maalintii ama email **fgmhelp@nspcc.org.uk**

Liiska xarumaha maxkamadeed ee codsiyada Amarada ka-hortaga FGM laga samayn karo

Codsiyada Amarka Ka-hortaga FGM waxaa la macaamila Maxkmada Qoyska. Codsi waa in loo diraa Maxkamada Qoyska oo fadhisa xarumaha maxkamad ee hoose. Xarumahaan maxkamad waxay caadi ahaan furanyihiin Isniin ilaa Jimco inta u dhaxaysa 10 subaxnimo iyo 4 galabnimo, hase yeeshee, Xarumo qaarkood waxay ku shaqeeyaan balan kaliya. Fadlan u cilaami Maxkmada markaad timaado in aad meeshaan u timid arrin dagdag ah.

Birmingham Civil and Family Justice Centre

Priory Courts
33 Bull Street
Birmingham
West Midlands
England
B4 6DS
Phone: 0300 123 1751
Email: family@birmingham.countycourt.gsi.gov.uk
or
e-filing@birmingham.countycourt.gsi.gov.uk

Bradford Combined Court

Exchange Square
Drake Street
Bradford
West Yorkshire
England
BD1 1JA
Phone: 01274 840274
Email: family@bradford.countycourt.gsi.gov.uk
or
e-filing@bradford.countycourt.gsi.gov.uk

**Brighton
Family Court
Hearing Centre** 1 Edward Street
Brighton
East Sussex
England
BN2 0JD
Phone: 01273 811 333
Email: sussexfamily@hmcts.gsi.gov.uk

**Bristol Civil
and Family
Justice Centre** 2 Redcliff Street
Bristol
England
BS1 6GR
Phone: 0117 366 4880
Email: family@bristol.countycourt.gsi.gov.uk

**Cardiff Civil
and Family
Justice Centre** 2 Park Street
Cardiff
South Wales
CF10 1ET
Phone: 029 2037 6400
Email: enquiries@cardiff.countycourt.gsi.gov.uk

**Central Family
Court** First Avenue House
42-49 High Holborn
London
England
WC1V 6NP
Phone: 020 7421 8594
Email: cfc.privatelaw@hmcts.gsi.gov.uk

**Derby
Combined
Court**

Morledge
Derby
Derbyshire
England
DE1 2XE
Phone: 01332 622600
Email: family@derby.countycourt.gsi.gov.uk

**East London
Family Court**

6th and 7th Floor
11 Westferry Circus
London
England
E14 4HD
Phone: 020 3197 2886
Email: eastlondonfamilyenquiries@hmcts.gsi.gov.uk

**Leeds
Combined
Court**

The Court House
1 Oxford Row
Leeds
West Yorkshire
England
LS1 3BG
Phone: 0113 306 2800
Email:
leedsdfcprivatelawgeneralenquiries@hmcts.gsi.gov.uk
or
leedspubliclawissue@hmcts.gsi.gov.uk

**Leicester
County Court
and Family
Court**

90 Wellington Street
Leicester
Leicestershire
England
LE1 6HG
Phone: 0116 222 5700
Email: family@leicester.countycourt.gsi.gov.uk

Liverpool Civil and Family Court Hearing Centre 35 Vernon Street
Liverpool
Merseyside
England
L2 2BX
Phone: 0151 296 2607
Email: family@liverpool.countycourt.gsi.gov.uk

Luton County Court and Family Court 2nd Floor, Cresta House
Alma Street
Luton
Bedfordshire
England
LU1 2PU
Phone: 0300 123 5577
Email: enquiries@luton.countycourt.gsi.gov.uk

Manchester County Court and Family Court 1 Bridge Street West
Manchester
Greater Manchester
England
M60 9DJ
Phone: 0161 240 5420
Email: familyapplications.manchester@hmcts.gsi.gov.uk

Norwich Combined Court and Family Hearing Centre Bishopgate
Norwich
Norfolk
England
NR3 1UR
Phone: 0344 892 4000
Email: family@norwich.countycourt.gsi.gov.uk
or
e-filing@norwich.countycourt.gsi.gov.uk

**Oxford
Combined
Court and
Family Court
Hearing Centre**

St Aldates
Oxford
Oxfordshire
England
OX1 1TL
Phone: 01865 264 200
Email: family@oxford.countycourt.gsi.gov.uk

**Plymouth
Combined
Court**

10 Armada Way
Plymouth
Devon
England
PL1 2ER
Phone: 01752 677 400
Email: family@plymouth.countycourt.gsi.gov.uk

**Portsmouth
Combined
Court Centre**

Winston Churchill Avenue
Portsmouth
Hampshire
England
PO1 2EB
Phone: 02392 893 000
Email: family@portsmouth.countycourt.gsi.gov.uk

**Preston Family
Court**

Sessions House
Lancaster Road
Preston
Lancashire
England
PR1 2PD
Phone: 01772 844 700
Email: prestonSFCissue@hmcts.gsi.gov.uk

**Reading
County Court
and Family
Court Hearing
Centre**

160-163 Friar Street
Reading
Berkshire
England
RG1 1HE
Phone: 0118 987 0500
Email: family@reading.countycourt.gsi.gov.uk

**Sheffield
Combined
Court Centre**

50 West Bar
Sheffield
South Yorkshire
England
S3 8PH
Phone: 0114 2812400
Email: family@sheffield.countycourt.gsi.gov.uk

**Teesside
Combined
Court**

Russell Street
Middlesbrough
Cleveland
England
TS1 2AE
Phone: 01642 340 000
Email: family@middlesbrough.countycourt.gsi.gov.uk

**West London
Family Court**

Gloucester House
4 Dukes Green Avenue
Feltham
Middlesex
England
TW14 0LR
Phone: 020 8831 3500
Email: westlondonfamilyenquiries@hmcts.gsi.gov.uk
